**Warbixin Ku Saabsan Horumarrada Mustaqbalka ee Glendale**

**English**
This information is important. If you do not understand it, please call your MPHA representative for free language assistance.

**Hmong**
Yog koj tsi to taub txog cov nqi lust seem ceeb no, thov hu mus rau ntawm tsev luam qhov chaw ua hauj lwm MPHA peb yuav pab ntxhais rau nej.

**Somali**
Halkan waxaa ku qoran war ama akhbaar aad u muhim ah, haddii aad fahmi kari weydo, fadlan ula tag wakiilka hay'adda MPHA, si aad tarjumaad bilaash ah uga hesho.

**Oromo**
Beeksifni kun hedduu barbaachisaa dha. Yaadni isaa hoo isiniif hin galle ta'e, bakka bu'aa "MPHA" (Bulchiinsa Mana Mootummaa Magaalaa Minneapolis) akka afaan isiniif hiikamu gargaarsa tolaa gaafadhaa.

Amharic (Ethiopian)
ይህ መረጃ በጣም አስፈላጊ ነው። ምን እንደሚል የማይገባዎ ከሆነ፣ ከየ MPHA (የሚኒያፖሊስ የመንግስት የመኖሪያ ቤቶች ባለስልጣን) ወኪል ጋር ተገናኝተው በነጻ የሚሰጥ የቋንቋ[ማስተርጎም] እርዳታ እንዲሰጥዎ ይጠይቁ።

**Laotian**
ຖ້າຫາກວ່າທ່ານບໍ່ເຂົ້າໃຈໃນຂໍ້ຄວາມສໍາຄັນນີ້, ທ່ານຕ້ອງໂທໄປຫາທັງ ຫ້ອງການເຮືອນຫລວງ MPHA ພວກເຮົາຈະຊ່ວຍອະທິບາຍໃຫ້ທ່ານ.

**Spanish**
Esta información es importante, si usted no lo entienda, por favor póngase en contacto con MPHA para asistencia lingüística gratuita.

**Haddii aad u baahan tahay caawimaad dhinaca luqadda ah, adeeg ku habboon naafonimo awgeed, ama aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan warkan, fadlan la xiriir Maamulaha Gurigaaga, Kayse Kruschke, adigoo ka wacaya (612) 342-1556.**

[Boggan si ula kac ah ayaa loo banneeyay]

Dadka Deggan Glendale ee Qaaliga ah: Juulyo 1, 2026

Bishii Juun 17-keeda, MPHA waxay soo bandhigtay qorshaheeda horumarinta Glendale: dhisme gebi ahaan cusub. Tan iyo 2024, shaqaalaha MPHA waxay hoggaaminayeen dadaallo ballaaran oo ay dadka deggen si toos ah uga qayb gelinayeen si loo ogaado waxa ay mudnaanta siinayaan mashruuc kasta oo mustaqbalka ka dhaca Glendale. Wacyigelinta waxaa ka mid ahaa kulamo furan oo dadka deegaanka, shirar bulsho, booqashooyin ay naqshadeeyayaashu ku yimaadeen guryaha dadka, barnaamijyo xagaa oo dhalinyaro iyo bulshada ah, saacado xafiis oo furan, iyo sameynta guddi la-talin oo ka kooban dadka deegaanka kaas oo si joogto ah u kulmayay inta lagu jiray 2026. Habkan dhammaystiran wuxuu u suurtageliyay shaqaalaha MPHA inay si dhow ula fadhiistaan qoysaska iyo shaqsiyaadka si ay u fahmaan xaaladahooda, isla markaana ay wax badan uga ogaadaan baahiyaha kala duwan iyo aragtiyaha dadka ee mustaqbalka Glendale. Wadahadalladan badan dhexdeeda, saddex qodob oo waaweyn ayaa soo baxay: dadka deggan waxay jecel yihiin bulshada Glendale, waxay aqoonsan yihiin in guryahoodu aanay hadda daboolin baahidooda, waxayna rabaan horumar ku saabsan ku-noolaanshaha iyo helitaanka adeegyada (accessibility).

**Si loo daboolo baahiyaha kala duwan ee qoysaska Glendale, MPHA waxay dib u dhisi doontaa dhammaan 184-ka guri ee hadda jira, waxayna sidoo kale ku dari doontaa 100 guri oo cusub oo loogu talagalay qoysaska.** Mashruuca dhismaha wuxuu yeelan doonaa guryo cabbirro kala duwan leh, laga bilaabo hal qol ilaa shan qol, waxaana lagu dhisi doonaa qaabab kala duwan sida dhismayaal hoose, guryo yaryar oo dhowr qoys ah (multiplexes), iyo guryo isku xiran oo loo yaqaan townhomes. Hay'addu waxay sidoo kale dhisi doontaa guryo la heli karo (accessible) iyo guryo hal dabaq ah oo lagu daro noocyo kala duwan oo dhismayaal ah. Marka laga reebo hagaajinta guud ee ku-noolaanshaha, caafimaadka, badbaadada, iyo helitaanka adeegyada, MPHA waxay sidoo kale kordhin doontaa meelaha baabuurta la dhigto, waxayna ku dari doontaa goobo cusub oo gudaha iyo dibadda ah oo bulshada loogu talagalay, iyadoo sidoo kale ilaalin doonta dhul cagaaran oo ballaaran oo ku yaalla dhismaha oo dhan.

Waxaan sidoo kale fahamsannahay in dadka deggen ay yeelan karaan welwel iyo su'aalo ku saabsan isbeddellada iyo shuruudaha la xiriira mashruucan. **Kiradaadaa (rent-kaaga) isma beddeli doonto sababta dhismahan.** Dhammaan guryaha Glendale waxay sii ahaan doonaan kuwo si federaal ah loo kabo (subsidized), dadka deggenna waxay sii wadi doonaan inay bixiyaan 30 boqolkiiba dakhliga qoyskooda ee la hagaajiyay sida ay hadda sameeyaan. Waxaad sii maqli doontaa doodaha ku saabsan habab kala duwan oo maalgelin ah oo MPHA ay u isticmaali karto mashruucan (sida Section 8, Section 9, Section 18, Rental Assistance Demonstration, Low-Income Housing Tax Credits, iwm.); dhammaan qalabkan ma beddeli doonaan sida kireysigaaga loo xisaabiyo. Intaa waxaa dheer, MPHA waxay sii ahaan doontaa hay'adda maamusha Glendale, waxayna sii wadi doontaa inay maamusho kadib dhismaha—sida ay u samaynaysay 74-kii sano ee la soo dhaafay.

MPHA waxay ka go'an tahay in qoys walba uu sii haysto guri inta lagu jiro dhismaha, in la ixtiraamo xuquuqda dadka hadda deggen ee ay ku soo laaban karaan, iyo in si hufan oo daahfuran loo wargeliyo tallaabo kasta oo geeddi-socodkan ka mid ah. **Aan si cad u sheego: qoys kasta oo si ku-meel-gaar ah loo raro waxaa loo dammaanad qaadayaa xuquuqda uu ugu laabanayo Glendale marka dhismaha la dhammaystiro—waa xuquuq uu ilaalinayo sharciga federaalka.**

*Macluumaadka wuxuu sii socdaa bogga 4* →

**Ilaa inta ugu badan ee suurtagalka ah, dadka deggen Glendale waxaa la siin doonaa fursad ay ku sii joogaan isla goobta inta dhismaha socdo.** Waxaad arki doontaa inaad MPHA oo diyaarinaysa ikhtiyaarro ku-meel-gaar ah oo gudaha goobta ah, iyadoo bilaabaysa in qaar ka mid ah guryaha Glendale laga dhigo kuwo bannaan. Tani waxay ka dhigan tahay in marka dhismuhu bilaabmo, MPHA ay heli doonto guryo bannaan oo gudaha goobta ah si qaar ka mid ah qoysaska loogu wareejiyo marka guryahooda la dayactirayo ama la dhisayo.

Dabayaaqada bishan, shaqaalaha hay'adda waxay bilaabi doonaan inay si gaar ah (hal-hal) ula kulmaan qoys kasta oo Glendale deggen si ay si fiican u fahmaan baahiyaha iyo dookhyada kala duwan ee qoys walba ee la xiriira dib-u-dejinta. Habkan wuxuu la mid yahay kii MPHA ay hore ugu samaysay boqollaal qoys oo kale oo ka tirsan mashruucyo dhisme oo badan sanadihii u dambeeyay. Shaqaaluhu waxay ka caawin doonaan qoysaska inay helaan ikhtiyaarro guri oo ku habboon baahiyahooda iyo rabitaankooda, isla markaana xogtan waxaa loo adeegsan doonaa in lagu diyaariyo heshiisyo iyo qorshayaal dib-u-dejin oo ay ku jiraan xuquuqda iyo dammaanadaha dadka deggen. Dhammaan qorshayaasha dib-u-dejinta ee dadka deggen, MPHA waxay sidoo kale bixin doontaa dhammaan kharashaadka guuritaanka ee qoyska, labadaba marka ay ka guurayaan gurigooda iyo marka ay dib ugu soo laabanayaan.

Tallaabooyinka xiga ee mashruucan waxaa ka mid ah in MPHA ay raadsato oggolaanshaha lagama maarmaanka ah ee magaalada, gobolka, iyo dowladda federaalka, sidoo kale ay sugto maalgelinta loo baahan yahay ee ka timaadda deeqaha maxalliga ah, gobolka, federaalka, deynta, iyo credit-yada canshuurta. Bilaha soo socda, MPHA waxay la wadaagi doontaa dadka deggen warar cusub oo ku saabsan jadwalka mashruuca, maalgelinta, iyo tallaabooyinka xiga—oo ay ku jiraan waxa la filayo ee ku saabsan qorsheynta dib-u-dejinta iyo sida nidaamsan oo loo fulin doono.

Laakiin shaqadeenna mashruucan weli ma dhammaan, waxaana weli u baahanahay caawimaaddiinna. MPHA waxay qaban doontaa kulamo dheeraad ah oo lala yeelanayo dadka deggen si loo dhammeystiro naqshadaha goobta iyo guryaha, looguna wadaago macluumaad ku saabsan HUD iyo qalabka guryaha la awoodi karo, sidoo kale loo bixiyo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan heshiisyada dib-u-dejinta ee dadka deggen, kuwaas oo qeexi doona dammaanadaha iyo ballanqaadyada MPHA ee ku saabsan dib-u-dejinta. Haddii aad xiisaynayso inaad ku biirto Guddiga La-talinta Dadka Deggen (Resident Advisory Group) si aad uga wada hadashaan mowduucyadan si faahfaahsan, fadlan la xiriir Maareeyaha Hantida, Kayse Kruschke, lambarka 612-342-1556.

Fadlan sidoo kale la soco ogeysiisyada ku saabsan dhacdooyin kale oo mustaqbalka ah, sida saacadaha xafiiska ee furan iyo kulamada bulshada. Waxaan rajaynaynaa in aad sii waddaan ka qaybqaadashada iyo fikirkiinna marka aan horumarineyno mustaqbalka Glendale.

Mahadsanid,

Abdi Warsame, Maareeyaha Guud/CEO
Minneapolis Public Housing Authority

*Macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan agabkii shirarkii hore iyo soo koobitaannadooda, ka hel bogga mashruuca ee internetka:*
*mphaonline.org/mpha-housing/portfolio/glendale-townhomes*